# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Ruut: Sheeko Jacayl Ah

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Lyn Doerksen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.


Haddaad la kulantid waaldiintii awoowayaashaadii – waalidiintoodii, oo dadkii oo idil eek a  soo jeeday qoyskiina u hor yimaadaan, lag ayaabee inaad la yaabee inaad la yaani lahayd nooca dadka ay yihiin.

Kitaabka Qudduuska waxa ku jiraa, mid ka mid ah faraca Ciise uu ka soo jeedo inay ahayd Ruut – naagtii reer Moo'aab ee sanamyada cabudi jiray.



Sheekada Ruutwaxay ka bilabatay Israa'iil xiligii ka dambaysay wkahtigii Samsoon.  Markii ay dadkii ay ka leexdeen rumeysadka iyo adeecidda Ilaah. Abaar ba'an baana ka dhacday waddankii. Ma garan kartaa waxa ay tahay abaarta? Waa hagaag!  Abaartu waa marka ay khudaarta iyo hadhuudka aysan bixin, oo xoolahana ay madhaan oo xitaa dakana ay gaajo u dhintaan.






Nin la odhan jiray Eliimelek, ayaa ka tagay Beytilaxam isaga iyo naagtiisa iyo laba will uu dhalay, si uu cunto u helo.  Wuxuu aaday Moo'aab, meeshiii dadkooda ay ku caabudi jireen sanamyada.



Xaaladiisa
kuma aysan
wanaagsanayn Eliimelek iyo qoyskiisaba
dadlkii Moo'aab. Wuumna dhintay, waxaana xigay
lanadiisii wiil.
Xaaskiisii,





Nimco way ka tagtay iyada oo la socdaan labadiisi
wiil naagahoodii. Ruut iyo Corfahna. Lbadaaa
gabdhoodba waxay ka soo jeedeen reer Moo'aab.

Nimco, iminka waa carmali/garoob, waxayna maqashay in Rabbiga dadkiisa soo booqday, oo cunto siiyey, waxayna go'aansatay inay dib ugu noqoto dalkeedii. Laakiin maxay ku samaynaysaa hablihii? Nimco waxay ku waanisay iyagii inay iska joogaam Moo'aab oo ay dib isaga guursadaan.




Corfah waxay isaga noqotay reerkoodii. Laakiin Ruut wey diidday. Ruut waxy tirisay gabay jacal ah oo ballanqaadaya inaysan marnaba waligeed ka tageen sodohdeeda.




Nimco saaxiibadeedna aad bay ugu riyaaqeen/farxeen inaay dib ugu soo laabato Beytalaxam. Laakiin waxay weyddiisatay inay ugu yeedhaan "Maara" intay ugu yeedhi lahaayeen Nimco (maqsuudin). "Qaadirka wuxuu iila macaamilooday si qdhaadh." Nimco wuxuu sii celiyey iyada oo madhan – Ruut mooyaane.






Inkasta oo ay Ruut caabudi jirtay sanamyada sidii dadka intiisa badan reer Moo'aab ay samayn jireen oo kale, way ka soo noqotay taasi oo waxay caaabuday Ilaaha nool ee reer Binu Israa'iil. Ruut waxay aad uga shaqaysay inay hubiso Nimco cunto ku filan inay cunto. Maalin walba waxay raaci jirtay beer gooyayaasha beerta oo waxay ka soo xaabxaabsan jirtay hadhuudhka ay ka daato oo ay kaga tagaan dhulka.








Bocas ninkii beerta lahaa, ayaa maqlay sida ay ugu wanaagsan tahay sodocdeeda. Markii uu la kulmay iyadiina, Bocas wuxuu ku caawiyey inuu amro beergooyayaashii inay uga tagaan hadhuuddh iyada si ula kac ah ama qasdi xambaarsan oo ujeeddo leh. Bocas wuxuu bilaabay inuu ka helo Ruut.




Markii Ruut uga sheekeysay Nimco waxyaalo ku saabsan Bocas iyo naxariistiisa, islaantii weyneyd Ilaah bay amaantay.
“Ninka waa noo dhow yahay oo waa xigaalkayo.”



Wakhtigaa kolkuu dhaafay ka dib, Bocas wuxuu doonay inuu Ruut guursado oo uu ilaaliyo Nimco iyo dhulkii reerku lahaa. Lakiin mid kale oo ka xigay ayaa fursadda koowaad lahaa. Ninkan dhulka ayuu doonayay – laakiinse ma uusan dooneyn Ruut inuu dumaalo oo ay noqoto xilo. Sharciga wuxuu leeyahay ma haysan karo mid keliya kan kale la'aantii.



Maalmahaa, dadku iskuma aysan gacan qaadi karin inay gaadhaan heshiis. Bocas wuxuu iska saray kabtiisa oo si muuqata oo dadka hortooda ah ayuu ku siieyey ninkii kale. Sidaas bayna arrintii ku dhamaatay oo uu heshiiskii ku dhacay.



Ruut na sidaas waxay ku noqotay afadiisii. Iminka iyadii iyo Nimco waxay ka mid noqdeen qoyskii Bocas.



Bocas iyo Ruut waxay u bixiyeen Coobeed wiilkii ugu horreeyey ee ay dhaleen. Oo wagii dambe noqday Daa'uud awowgii, boqorkii weynaa ee reer Binu Israa'iil.

Laakiinse waxaa aad cajiib u ah, ilmahaa Coobeed faraciisa waxaa ka soo jeeda Rabbi Ciise Masiixa. Oo abtirsiinyadiisuna gasho qoyska Daa'uud inay u ahaaatay boqorka boqorada ahna Badbaadiyah dunida.



Ruut: Sheeko Jacayl Ah

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Ruut

“Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa.” Sabuurka 119:130

# Dhammaad

16

60

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16